

Waalidiinta sharafta leh,

Dawladda Finland waxaa ay shalay oo taariikhdu ay ahayd 16.3.2020 soo saartay amar ujeedadiisu tahay sidii loo joojin lahaa faafitaanka fayruska koroona. Magaalada Vantaa waxaa looga shaqaynayaa si waafaqsan amarkaas, sababtaas awgeed ayaa adeegyadii barbaarinta hore waxaa ku dhacaya isbeddel.

Xannaanooyinka, kuwa kooxaha ee xannaano qoyseedka (ryhmäperhepäiväkodit), xannaano maalmeedka qoyska (perhepäivähoito) iyo waxbarashada horeba (esiopetus) waxaa ay u soconayaan sidii caadiga ahayd.

Haddii aad carruurtaada guriga ku haysan karto, ha keenin xannaanada. Hana ka codsan qof waayeel ama da' ah in uu kuu daryeelo carruurtaada. Sidaas ayaan uga hortagi karnaa faafitaanka fayruuska koroona, waxaa kaloo aan sidaas ku sugi karnaa arrinka ah, in barbaarinta hore loo diyaariyo carruurta ay waalidkood khasabka ku tahay in ay goobta shaqada joogaan. Shaqooyinka waxaa tusaale ahaan ka mid ah, shaqooyinka caafimaadka iyo arrimaha bulshada iyo shaqooyinka badbaadada.

Haddii carruurtaadu aanay imaanaynin xannaanada ama goobtii barbaarinta hore, waxaad sidii caadiga ahayd noogu soo sheegtaa telefoonka, iimaylka ama farriinta telefoonka, laga bilaabo 18.3.2020.

Xannaanooyinka furan ee qof walbaa tagi karo (avoimet päiväkodit) beerta ciyaarta ee xaafadda (asukaspuistot), naadiyada (kerhotoiminta) iyo adeegyada caawimaada daryeelka (hoitoapalvelu) dhammaantood waa ay xiran yihiin inta u dhexeysa 18.3.-13.4.

Faahfaahin dheeraad ah ayaan idiin soo diri doonnaa, haddii ay xaaladdu isbeddesho. Sidoo kale waxaad faahfaahin dheeraad ah ke heli kartaa maamulaha xannaanada carruurta iyo maamulaha barbaarinta hore ee xaafadda aad deggan tahay.

Tilmaan- bixintaan ama hagistaan aan kor ku soo sheegnay waxaa ay shaqaynayaan illaa iyo 13.4.2020.

Waad mahadsan tihiin

Sole Askola-Vehviläinen  
Maamulaha barbaarinta hore